



Macluumaaad bixin xaga ciyaaraha ah: Cody Soo ga Cleveland oo ku guuleystay Tartanka Dabbaasha Gobolka; Ciyaaraha isreebreebka kubadda kolayga oo bilaabmay

Kadib marki tartamayaashi dabbaashu u tartameed bardhamaadka 100 yaardi ee dabbaasha habka xorta ah kamadambaystii Tartamada gobolka nooca 6A ee OSAA, labadii tartame ee ugu sareeyey aad bay isugu dhowaayeen, dhamaan madaxdii joogtay Tualatin Hills Aquatic waxay usoo wada wareegeen siday u eegi lahaayeen saacada korontada ku shaqaysa ee dhibcaha lagu qoro, taasi oo soo muujisay tani: ardayga sii dhamaynaya dugsida sare Cody Soo uu dhigay wacdaroo taariikhii ah, isagoo ku guuleystay horyaalka gobolka .

“aad baan ugu faaneynaa isaga” waxaa yidhi Mollie Starr oo ah tababaraha Cleveland. “waa guul aad u wayn”

Cody waxaa uu ku guuleystay tartanka isagoo ku dhameeyey 45.77 ilbidhiqsi, isagoo ka horeeyey 0.05 ilbidhiqsi ardayga sii dhamaynay dugsiga sare Jacob Folsom oo dhigta dugsiga sare ee Sherwood. Qiyaasti hal saac ka hor, Folsom waxaa uu ku guuleystay 200 ee dabbaasha xorta ah taasi oo Cody uu galay kaalinta sadexaad.

Wakhtiga guusha ee Cody waa kii ugu sareeyey ee uu sameeyo iyo isagoo aad iyo aad uga dhaqsa badnaa wakhtigii lasoo dhaafay ee uu u tartamayey 100 dabbaasha xorta ah ee gobolka , markii uu ahaa arday kujira sanadkii labaad ee dugsiga sare 2018kii, wakhtigaas oo uu galay kaalinta 10^{aad} wakhti dhan 48.63 Ilbidhs. Hal todobaad ka hor kulankii gobolka ee sanadkan, wuxuu ku guuleystay tartanki dhacay ee kulankii dagmada PIL wakhti dhan 47.13 iyo sidoo kale isaga oo ku guuleystay 200 ee dabbaasha xorta ah.

Cody waxaa uu noqday ardaygii ugu horeeyey ee ku guuleysta tartanka horyaalka dugsiyada ee Portland bilada tartanka dabbaasha ee wiilasha illaa iyo 2017kii, markaasi oo SamHarquail oo ka socday Grant uu ku guuleystay 200 ee isku dhafka ah iyo 100 xabad ku dabbaalashada, Evan Carlson oo ka socday dugsiga Wilson ayaa wuxuu qaataay 50 dabbaasha xorta ah.

Cody waxaa uu ka qayb galay tartanadii lagu kulmay gobolka afartii sano ee dugsiga sare, isagoo daba socda raadkii labadii wiil ee ka waaweynaa walaalahana ahaayeen Steven iyo Tyler, kuwaasi oo ciyaaraha dabbaasha gobolka u matalayey Cleveland. Cody waxa uu u tartamay 100 iyo 200 boqol ee dabbaasha xorta ah ciyaariihii gobolka isagoo markaas ahaa arday dugsiga sare markaas uun billaabay iyo isaga oo markaas u gudbay sanadki labaad, intaas ka dibna waxaa uu u wareegay 50 dabbasha xorta ah iyo 100 habka dabbaasha balanbaalista kulamadi lagu tartamay ee gobolka sanadki 2019 ka, isagoo galay kaalimaha sagaalaad iyo todobaad.

Sanadkan, Cody waxa uu noqday dabbaalyahankii shanaad ee ka socda Cleveland ee ku guuleysta tartanki gobolka ee wiilasha si saqsi ah iyo kii ugu horeeyey mudo 60 sano ah ee ku guuleysta tartenadi ugu bandaa, illamaa iyo markii Dick Boyd uu ku guuleystay afartii tartan ee ugu dambeeyey gobolka oo isagu qaata lana qabtay sanadihii 1959 iyo 1960.

Dale Sweatt waxaa uu ahaa horyaalkii ugu horeeyey ee dabbaasha wiilasha ee gobolka Cleveland, kaas oo ku guuleystay 200 ee dabbaasha xorta ah sanadkii 1954 tii. Kadib markii uu Boyd ku guuleystay afartaasi, Cleveland waxa xigay oo ay ku guuleysatay bilad goboleed 2018, markaas oo Warriors ku tartamayeen nooca 5A and Luke Donohue uu ku guuleystay 100 nooca dabbaasha balanbaalista. Xataa heerka 5A, Sam Donohue uu ku guuleystay 100 habka dabbaasha dhabardhabarka sanadii 2012 iyo Cleveland waxay ku guuleysatay guulo isxigxiga ee gobolka 200 isku dhafka ciyaartooydu isbedbedalaan ee sanadihii 2011 iyo 2012.

Wiilasha kubbadda kolayga: Dugisa Jefferson ayaa ka qayb galay isreeb reebka nooca 6A isagoona noqday midka mida kuwa ugu sar sareeya oo la saadaalinayo inay ku guuleystaan horyaalka gobolka kadib xili ciyaareed ay aad u xooganaayeen kaasi oo dimoqraadiyiintu ay socdeen illaa 16-0, ayagoo celcelis ahaan ku guuleystay halbeeg dhan 24.9 dhibcood. Dimoqraadiyiintu waxay ciyaareen kulanka horyaalka gobolka sanadii la soo dhaafay, waxaana ka adkaaday Jesuit.

Dugsiga Grant, kaasi oo ku dhamaystay kaalinta labaad ee horyaalka 13.3, iyo Cleveland oo gashay kaalinta sadexaad (11-5) ayaa helay isreeb reebka hubantidu ku jirto, kaasi oo lagu go'aamiyo kala sareynta computerku soo saaro ee ururka waxqabadka dugsiyada Oregon. Ciyaaraha gobolku waxay billaabmayaan maalinta arbacada, oo ay ku xigaan tartanka gobolka 12-14 Maarso kana dhici doona xarunta Chile. Qorshaha oo buuxa iyo kooxaha isla socda waxaa laga heli karaa OSAA boga isreeb reebka ciyaaraha kubbadda kolayga ee wiilasha ([OSAA boys basketball playoff page](#)).

Gabdahaha kubbadda kolayga: Xilliga ciyaareedka joogtada ah ee PIL ayaa ku soo noqday meel la garanayo maxaa yeelay Dugsiyada Benson iyo Grant ayaa wadaagay qaadashada horyaalka afartii sannadood ee la soo dhaafay iyagoo gaadhad diwaan dhan 15-1, iyadoo loo kala jabiye labadoodii kulan. Techsters, kuwaasi oo markoodii ugu horeysay ku guuleystay horyaalka gobolka sannadii la soo dhaafay iyo Generals oo ay soo raaceen kooxdii gashay kaalinta sadexaad ee dugsiga Lincoln iyagoo helay si toos ah inay ugu soo baxaan isreeb reebka ciyaaraha ay mutaysteen.

Ciyaaraha gobolku waxay billaabmayaan caawa, halka tartanka gobolku uu ku beegan yahay 11-14 Maarso goobtuna waa xarunta Chiles. Jadwallada oo buuxa iyo isku-aadka kooxaha waxaa laga heli karaa OSAA bogga isreebreebka ciyaaraha kubbadda kolayga ee gabdhaha ([OSAA girls basketball playoff page](#)).